

MADAXA III

**JIDADKA LAGU XAQIIJINAYO IYO KUWA LAGU DAM-
MAANAYA XUQUUQDA DEYNLEYAASHA.**

Qodobka 231aad

1. Dhammaan hantida uu leeyahay deynqabaha waxey
dammaan u yihii bixinta deyntiisa.

2. Marka uusan jirin xaqa kala hormarinta ee ku dhi-
san xeerka, dhammaan deynleyaasha wey u siman yihii
dammaankaasi.

QAYBTA I

JIDADKA XAQIIJINTA

Qodobka 232aad

1. Deynle kasta waxaa u bannaan, xataa marka aan la
gaarin muddada deynta lagu warsan karo in uu ku isticmaalo
magaca deynqabaha dhammaan xuquuqdiisa, ayadoo laga-
reebayo kuwa ku saabsan qof ahaantiisa ama kuwa aan la
xaraashi karin.

2. Iisticmaalka deynlaha ee xuquuqda deynsanaha ma
la oggolaanayo haddii uusan caddeyn in deynqabaha uusan
isticmaalin xuquuqdaas, isticmaal la'aantaas oo dhalineysa
ama cusleyneysa awood la'aanta bixinta deynta. Deyn-
luhu marka uu ku isticmaalayo xuquuqda deynqa-
baha waxaa loo aqoonsanayaa in uu wakiil ka yahay isaga.
Faa'iido kasta ee ka dhalata isticmaalka xuquuqdaas waxay
ka mid noqoneysaa hantida deynqabaha, waxeyna lammaan u
tahay dhammaan deynleyaasha.

Qodobka 233aad

Deynluhu marka uu ku isticmaalayo xuquuqda deynqa-
baha waxaa loo aqoonsanayaa in uu wakiil ka yahay isaga.
Faa'iido kasta ee ka dhalata isticmaalka xuquuqdaas waxay
ka mid noqoneysaa hantida deynqabaha, waxeyna lammaan u
tahay dhammaan deynleyaasha.

Qodobka 234aad

Deynle kasta ee deyntiisu gaartey gudid, wuxuu warsan karaa in macaamilka qaunuunee (atto giuridico) ee uu sa meeyo deynqabaha, dhibna u keenayo xuquuqdiisa in aan la sulin macaamilkaas. Wuxaa shardi ah in macaamilkaas, ha ahaado mid yareynaya hantida deynqabaha ama mid badina ya waajibaadkiisa in uu ahaado mid keenaya ama xoojinaya awood la'aanta bixinta deynta, ayna jiraan shuruudaha ku cad qodobka soo socda.

Qodobka 235aad

1. Haddii macaamilka deynqabuhu yahay wax kala beddelasho (oneroso), deynluhu waxaa looga hortagi karaa oo keli ah haddii ay jirto khiyaamo ka timid xagga deynqabaha, dhinaca kalena uu ogaa khiyaamadaas. Si loo qaato in macaamilkaas khiyaamo ku dhisan yahay, waxaa ku filan oo keli ah in deynqabuhu ogyahay, marka macaamilka uu dham meenayo in deynta uusan bixin karin dhinaca kale waxaa loo qaadanayaa in khiyaamada deynqabaha ogyahay haddii uu la socday in deynqabuhu uusan bixin karin deyntaasi.

2. Haddii macaamilka uu dhammeeeyey deynqabaha uu yahay mid ku dhisan siismo, loogama hortagi karo deyn laha xataa haddii qofka waxa iibsaday uu niyadsamay. deyn qabuhuna uu ku kicin inaba khiyaano.

3. Haddii qofka sheyga u wareegay ku wareejiyo shey gii qof kale, isagoo wax uga beddelenaaya, deynluhu kuma dacwoon karo ka hortagidda macaamilka deynqabaha, haddii laga reebo marka dhinaca labaad ee sheyga u wareegay uu ogaa khiyaamada deynqabaha, kan horeyna uu ogaado khiyaamadaas, marka uu yahay macaamilka deynqabaha wax kala beddelasho iyo haddii laga reebo marka macaamilka ku dhisan yahay deeq, kan wax u wareegeen ee labaad ogyahay awood la'aanta bixinta deynta ee deynqabaha waqtiga uu qofka wax u wareegeyn ee horey u dhammeeeyey macaamilka.

Qodobka 236aad

Deynlaha ku andacoonaaya in deynqabaha uusan lahayn awood uu deynta ku bixiyo, waxaa waajib ku ah keli ahaan in uu caddeeyo inta ay la eg'tahay deynta laga doonayo. Deyn qabaha waxaa waajib ku ah in uu sugo in dakhligiisu la'ey yahay ama ka badan yahay kharajkiisa.

Qodobka 237aad

Marka la caddeeyo in macaamilka la socod-siin karin, nafci kasta ee ka dhasha waxaa ka faa'iideysanaya dham maan deynleyaasha ee macaamilkaasi lagu dhibayo.

Qodobka 238aad

Haddii qofka uu u wareegay sheygii deynqabaha ee aan lahayn awoodda bixinta deynta qiimaha. wuxuu uga baxsan karaa dacwadda deynlaha markii uu bixiyo qiimaha, uuna dhigo khasnadda Maxkamadda. Wuxaase shardi ah in qiimaha uu la mid yahay qiimaha caadiga ah.

Qodobka 239aad

1. Khiyaamada ku eg keli ahaan in deynle laga hormariyo mid kale si xaq darro ah, waxaa ka dhalanaya in laga reebo deynlaha faa'iidadaas.

2. Haddii deynqabaha aan deynta bixin karin uu sii yo deynlayaashiisa mid ka mid ah, inta aan la gaarin mud dadii horey lagu heshiiyey, bixintaas loogama hor istaagi ka ro deynleyaasha kale. Sidoo kale, loogama hor i...ro bixinta la sameeyey muddada markii la gaaray kaddib, haddii si khiyaamo ku jirta ay u heshiiyaan deynqabaha iyo deynla ha deynta loo guday.

Qodobka 240aad

Dacwadda is hortaagga waxey ku dhaceysaa 3 sano ka billaabata maalinta deynlaha uu ogaaday sababta ka hortaga. Markasta dacwaddaasi waxey ku dhaceysaa 15 sano ka billaabata maalinta macaamilka la durayo uu dhammaaday.

Qodobka 241aad

1. Marka xaaladda heshiiska dhasoon jiro. (simulazione) waxaa u bannaan deynleyaasha dhinacyadda heshiiska gashay iyo kuwa xaqa u wareego, sababo gaar ahaaneed lehna niyo-sami in ay ku dacwoodaan macaamilka muuqda. Waxaa kale oo u bannaan in ay ku dacwoodaan macaamilka daahsoon, ayagoo ku caddeynaya si kastaba daahsoonaanta macaamilka wax u dhimay.

2. Marka ay iska hqr yimaadaan dano dad badan ka dhaxeeya, qofka ku dacwoonaya macaamilka muuqda ayaa laga hormarinaya qofka ku dacwoonaya macaamilka daahsoon.

Qodobka 242aad

Marka macaamilka muuqda uu qarinaayo macaamil jira, macaamilka jira oo keli ah ayaa natijo u yeelanaya dhinacyada heshiiyey iyo kuwa xaqooda u wareegayo guud ahaan.

QEYBTA II

TALLAABOOYIN DAMMAANEED XAQA CESHESADDA

Qodobka 243aad

1. Qofka ay waajib ku tahay gudashada wuu ka reeb-toomi karaa in uu fuliyo gudashadaas, haddii deynluhu uusan oggolaan inuu fuliyo waajibka asaga saaran in uu ga-jibkaas oo leh xiriir sababeed iyo isku xirnaan kan deynqada-ha, ama haddii deynluhu bixinin dammaan ku filan in ay xaqijiso bixinta deynta.

2. Xaqaas waxaa iska leh gaar ahaan qofka sheyga ku haysta mulkiyad ahaan (possessore) ama haysadaha (detentore) shey ee galay kharaj lagama maarmaan ah ama faa'iido u leh sheyga. Waa bannaan tahay haysashada sheygaas ilaa inta la ga soo celiyo kharajka lagu muteystay, ayadoo laga reebayo marka xilka celinta uusan ku dhisneyn fal xaaraan ah.

Qodobka 244aad

1. Xaqa ceshasada u noqon meyso dammaan deynlahaa
2. Waxaa waajib ku ah qofka ku isticmaalaya xaqa ceshasadda in uu dhowro sheygaas sida waafaqsan axkaanta ni-daamineyso rahanka, waana in uu ka keenaa xisaab miraha.
3. Ceshadaha (ritentore) waxaa u bannaan in uu ka helo Garsooraha oggolaasho gadid, haddii arrintu ku saabsan tahay alaab hallaabeyso ama baaba'eyso sida waafaqsan Qodobka 908. Xaqa ceshasadda wuxuu u wareeggaa markaas qiimaha alaabta la gaday.

Qodobka 245aad

1. Xaqa ceshasada (ritenzione) wuxuu ku dhacaa lumlahda haysashada mulkiyad ahaaneed ama haysashada (detenzione).
2. Hase yeeshie waxaa u bannaan haysadaha waayey haysashada asagoon ogeyn, ama asagoo ka soo horjeeda ama diidan, in uu soo ceshado sheygii, haddii uu sidaa ku warsado 30 maalmood dhexdood laga billaabo marka uu ogaado lumlahda haysashada milkiyad ahaaneed (possessore) ama haysashada (detenzione) waxaana shardi ah in eysan ka soo wareegan hal sano taariikhda sheyga lumay.

QEYBTA III

AWOOD LA'AANTA BIXINTA DEYN TA

Qodobka 246aad

Waa la cadeyn karaa in deynqabaha ku jiro xaaladda awood la'aanta bixinta deynta, haddii xoolahiisa eyna ku filneyn bixinta deymahiisa gaaray waqtigii la weydiisan lahaa.

Qodobka 247aad

Awood la'aanta bixinta deynta waxaa lagu caddeynayaa xukun Maxkamadda Gobolka ee leh awoodda xagga dalka, lagana helo degnaashaha deynqabaha, taasoo ku imaan karta weydiisashada deynqabaha laftiisa ama mid ka mid ah deleyaashiisa. Dacwadda ku saabsanna waxaa loo qaadayaa habka deg-degga ah.

Qodobka 248aad

Maxkamadda mar kasta, inta eyna caddeyn xaaladda awood la'aanta bixinta deynta se deynqabaha, waa in ay tix-gelisaa dhammaan duruufta ku saabsan deynqabaha ha ahaato mid guud iyo mid gaarba, waxaa waajib ku ah, sidoo kale in ay tixgeliso xoolaha uu yeelan karo mustaqbalka awooddissa qof ahaan mas'uuliyadda sababaha dhaliyey awood la'aanta bixinta deynta danaha bannaan ee deynleyaashiisa iyo duruuf kasta ce sameyn karta xaaladiisa maadiga ah.

Qodobka 249aad

Muddada lagu sameyn karo ka hortagga xukunka ku saabsan arrimaha awood la'aanta bixinta deynta waa 8 beri, rafcaankeedana waa 15 beri oo ka billaabata taariikhda gaarsiinta (notifica) xukunka.

Qodobka 250aad

1. Kaaliyaha Maxkamadda maalinta weydiiska caddeynta awood la'aanta bixinta deynta lagu qoro diiwaanka waa in uu ku sii qoraa warqadda dacwadda diiwaan gaar ah ee ay iska leeyihiin deynma-gudeyaalka. Sidoo kale, waa in uu ku xusaas geeska qoraalkaas xukunka ka soo baxay weydiiska awood la'aanta bixinta deynta' dhammaan xukunadda si adkeeyya ama baabi'iya, ama taariikhda xukunka lagu dhawaaqay.

2. Intaa Kaaliyaha waxaa u dheer, waa in uu u sii gudbiyaa Kaaliyaha Maxkamadda Rafcaanka nuqul ka mid ah qoraaladda ay la jiraan xusuusinta geeska ku qoran si loogu dhigo diiwaanka guud, kaasoo qabashadiisa lagu nidaamina-yo Dekreeto oo uu soo saaro Wasiirka Caddaaladda iyo Ar-rimaha Diinta.